



Macluumaadka ku saabsan amaanka taleefanka iyo adeegyada muhiimka ah ee bilaashka ah ee guriga

Wixii su'aalo ah, fadlan la xidhiidh maamulka guryaha aaga

kasta oo adeega guriga ah:

Arbrå	0278-254 20
Bollnäs	0278-257 32
Kilafors	0278-254 36
Rengsjö	0278-250 93



Telefoonka Ammaanka

Telefoonka ammaanku waxa uu kuu sahlayaa inaad wakhti kasta la xidhiidhi karto shaqaalaha adeegyada guriga. Telefoonka ammaanka ah waa inaan loo qaadan qaylo dhaanka adeeg mana badali karo SOS 112. Marka lagu siiyo telefoonka ammaanka, daakhilaani bilaa fure ah (Phoniro) ayaa laguugu rakibi doonaa.

Maxay tani uga dhigan tahay qofka isticmaalaya?

Marka la rakibayo telefoonka ammaanka ah iyo daakhilaaniga bilaa furaha ah, furaha guriga waa in la siiyaa qofka rakibaya (shaqaale ay dawlada hoose soo dirtay).

Tani waxay noo saamaxaysaa in meesha aanu galin karno hadii ay mushkilad ku timaado daakhilaaniga.

Kaliya shaqaalaha adeegyada guryaha ayaa kasoo gali kara daakhilaaniga bilaa furaha ah marka aad qaylo dhaan u dirato. Waxaa lagu siin doonaa badhan qaylo dhaan ah oo biyo ayna waxba yeeli karin oo aad xataa baadka ku isticmaali karto.

- Waa inaad tijaabisaa badhanka qaylo dhaanka hal mar bishii.
- Maamulka Adeegyada Bulshaddu kama jawaabi karaan mushkilada telefoonka ammaanka habeenkii ama ayaamaha fasaxa.

Marka la guuro ama la joojiyo

- La socodsii maamulaha guriga ee aagaaga wakhti macquul ah kahor inta aanad guurin.

Anakaa dabari doonaa dib u bixinta iyo dib u rakibida telefoonka ammaanka iyo daakhilaaniga bilaa furaha ah.

Telefoonka ammaanka / badhanka qaylo dhaanka oo la waayay

- Hadii aan lasoo celin telefoonka ammaanka iyo/ama badhanka qaylo dhaanka marka la joojiyo, waxaa lagaa qaadi doonaa kharashka telefoonka ammaanka/badhanka qaylo dhaanka (isticmaalaha).

Adeega guriga bilaa furaha ah - Phoniro

Dawlada hoose ee Bollnäs waxay ka shaqaynaysaa sidii ay kor ugu qaadi lahayd badbaadada iyo amaankaaga isticmaale ahaan, hawshaasna waxaa kamid ah, waxaanu ku badalaynaa daakhilaaniga hore ee furayaasha lahaa daakhilaaniga aan fure lahayn ee Phoniro.

Daakhilaaniga waxaa lagu dhajinayaa albaabka gurigaaga laga soo galo waxaana la badalayaa gacantii albaabka laga baxo iyada oo aanay saamaynin albaabka.

Iyada oo la isticmaalayo taleefanka, shaqaalaha adeegyada gurigu waxay furayaan oo ay xidhayaan albaabka. Adiga, wax isbadal ah arki maysid, daakhilaaniga waxa uu kuugu shaqaynayaa sidii caadiga ahayd dibada iyo gudaha, waxaanad isticmaalaysaa fure.

Maxay tani uga dhigan tahay qofka isticmaalaya?

- Phoniro waxaa loogu rakibaa dadkiina aan awoodin inay iyagu ka furaan shaqaalaha adeegyada guriga.
- Phoniro wax kharash ah oo dheeraad ah kuma taagna isticmaalaha.
- Hadii aad leedahay caymis guri, ma saamaynayso lahaanshahaaga aad ku rakibatay Phoniro waxaanu u dhaqan gashanaan doonaa sidii markii hore.
- **Marka Phoniro lagu rakibayo, furaha guriga waa in la siiyaa qofka rakibaya (shaqaale ay dawlada hoose soo dirtay). Tani waxay noo saamaxaysaa in meesha aanu galin karno hadii ay mushkilad ku timaado daakhilaaniga.**
- Phoniro waxaa lagu dhajin karaa badi albaabada, laakiin hadii daakhilaaniga loo baahdo in la badalo, dawlada hoose ayaa masuuliyadaas iska leh, taas oo ay kamid tahay kharashkeeda.
- Kaliya shaqaalaha adeegyada guriga/daryeelka caafimaad ayaa kasoo gali kara albaabka bilaa furaha ah.
- Daakhilaaniga albaabka laga saaray (kaas oo uu albaabkaagu lahaa) waa in gurigaaga lagu kaydiyaa, kartoona shirkada.
- Dawlada hoose ee Bollnäs kama masuul aha daakhilaaniga albaabkaaga ee luma.

Marka la guuro ama la joojiyo

- La socodsii maamulaha guriga ee aagaaga wakhti macquul ah kahor inta aanad guurin. Anakaa dabari doonaa dib u bixinta iyo dib u rakibida telefoonka ammaanka iyo daakhilaaniga bilaa furaha ah.